

Cudurada canugaaga difaaca ka helaayo

Halkaan baa waxaa ka akhrisankarta warbixin kale oo ku saabsan cudurada kamid barnaamishka tallaalida iyo canugaaga heli difaac haddii laga tallaalo.

Faayraska sababta u ah shubanka [Rotavirusinfektion] waa infekshanka calool xanuunka oo sababta u ah in carruurta shubman, matagaan iyo jirkooda qallalo. Marmar canuga wuxuu u baahnan kara in isbitaalka la jiifiyo oo meeshas daryeel caafimaad lagu siiyo.

Cudurka cumaha ku dhaco [Difteri] waa cudur si fudud u faafo iyo infekshan luqunta halis u ah oo dhaawac halis u geysankaro wadnaha, kiliyaha iyo habka-dareemayaasha jirka.

Teetano [Stelkramp] waxaa sabab u ah bakteeriyaa oo ku nool ciida iyo mindhicirada xayawaanka. Canuga waa ku dhicikarta teetano haddii xayawaan qaniino ama meel nabar ah wasaq ka noqoto. Canuga markas waxaa ku dhici muruq kogid iyo iyo waxaa ka adkaan inuu wax liqo iyo neefsado. Teetano ma'ahan waxa labo qof oo bina'adan ey kala qaadikaran.

Xiiq dheer [Kikhosta] waa cudur si fudud u faafo iyo qofka ku ridi qufac aad u culus iyo qufac qofka haynkaro dhowr bilood. Carruurta hada dhashay wuxuu ku noqonkara cudur noloshooda halis galiyo.

Cudurka dabaysha [Polio] cwuxuu dhaawici habka-dareemayaasha jirka iyo sabab u noqon qofka inuu curyaamo iyo dhaawac noloshiisa ka soo fiicnaaneyn.

Bakteeriyada sababto xanuunka dhegta nooca B [Haemophilus influenzae typ B (Hib)] wuxuu sabab u noqonkara infekshano halis, qaasatan carruurta ka yar shan sano. Hib wuxuu sabab u noqon infekshanka maskaxda oo halis noqonkaro ama keenikaro dhaawac qofka noloshiisa ka soo fiicnaaneyn.

Bakteeriyada sababto xanuunka ku dhaco xubnayaasha laga neefsado [Pneumokocker] wuxuu carruurta ku ridaa infekshanka dhegaha iyo sanqa-

da, iyo xita cuduro ka sii halis badan sida infekshanka ku dhaco sambabaha, dhiig sumayn iyo infekshanka xubinta ku daboolan maskaxda.

Jadeeco [Mässling] waa cudur si fudud u faafo iyo qandho aad u badan qofka ku ridi, qufac iyo maqaarka jirka baa wax uga soo bixi. Carruurta waxey ka sii qaadikaran cuduro kale sida infekshanka xubinta ku daboolan maskaxda, infekshanka dhegaha iyo infekshanka sambabaha. Marmar qofka jadeecada buu u dhiman.

Cudurka sababo xanuun oo daamanka ku bararin [Påssjuka] waa cudur si fudud u faafo iyo saameyn qanjidhka abuurto candhuufaha, laakin ka sii qaadikarta cuduro kale sida infekshanka xubinta ku daboolan maskaxda iyo infekshanka maskaxda. Wiilasha waxaa ku dhici infekshan xiniinyaha.

Faayraska sababo cudur jirka u yeeli finan yar yar [Röda hund] waa caadiyan infekshan fudud, laakin haddii dumar uur leh ku dhaco waxaa halis ah in canuga ka soo dhaco ama canuga dhasho asagoo dhaawacan is halis ah.

Faayraska la dhaho [Humant papillomvirus (HPV)] waa infekshan ku dhaco maqaarka iyo qaybaha jirka ee shida balqanka. Infekshanka ma'ahan mid qofka caadiyan iska dareemi oo waa mid iskiis u reysan laakin haddii uusan reysan wuxuu badali unug jirka ka suubsanyahay iyo luqunta makaanka ku ridi kaansar iyo noocyo kale oo kaansar nolosha dambe.

Cagaarshow nooxa B [Hepatitis B] wuxuu sabab u noqon infekshanka ku dhaco beerka. Dadka inta ugu badan infekshanka weey ka fiicnaan iskood, laakin marmar faayraska jirka buu ku sii jiri iyo wuxuu dhaawici beerka ama sababi in beerka kaansar ku dhaco. Halista arrintan waxey aad u weeyntahay haddii qofka lagu daarto marka uu canug yahay.

Dhammaan tallaalada qofka la siiyo oo kamid ah barnaamishka tallaalada waxaa laga diwaangalin liiska guud qaranka oo tallaalada oo Hey'adda arrimaha caafimaadka [Folkhälsomyndigheten]. Diwaangalinta baa waxey fududeyn in dabagal lagu suubinkaro haddii barnaamishka tallaalada noqdan sidii loogu talagalay.

Miyaa dooneysaa warbixin kale?

Fadlan adiga ku soo dhawoow oo la soo xiriir ruugta caafimaadka carruurta ama kooxda caafimaadka ardeyda oo iskuulka canugaaga dhigto. Adiga warbixin kale waxaa ka akhrisankarta:

- 1177.se
- Folkhalsomyndigheten.se
- Lakemedelsverket.se

